



Förskoleknappen

Oo internetka & appka!

Förskoleknappen (badhanka dugsiga barbaarinta) waa adeeg elektaroonig ah oo loogu talaglay qofka adigoo kale oo ay ilmo u dhigtaan mid ka mid dugsiyada barbaarinta ee degmada Eskilstuna.

Badhankaan wuxuu waalid ahaan fursad kuu siinayaa inaad si fudud u isticmaasho adeegga elektarooniga ah si aad u la socoto maalinta cunuggaagu joogo dugsiga barbaarinta. Shaqaalaha dugsigu waxay waqti dheeraad u helayaan in ay la joogaan carruurta mar haddii hawlaha maamulku ka yaraado.

Bartaan www.eskilstuna.se/forskoleknappen waxaad ka heleysaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u isticmaaleyso badhankaas.

Haddaba si aad uga faa'iideysato adeeggaas waxaad marka ugu horreeya u baahan tahay inaad kombiyuutarka ka gasho. Kood ku geliddaas waxaa loo adeegsanaa habka aqoonsiga elektarooniga ah, oo ah hab dhaqso ah oo ammaan ah oo waayadaan dambe caadi ka noqday adeegyada internet. Haddii aadan haysan aqoonsi elektaroonig ah waxaa la xiriireysaa bangigaaga si laguugu sameeyo.

Markaad gasho waxaad ku buuxineysaa warbixinahaaga isticmaalka iyo magaca iyo koodka aad ugu baahan tahay inaad isticmaasho adeegga appka mobiilka ama iPadka.

Appka loo adeegsado Förskoleknappen ayaad soo degsanaysaa oo ku keydsanaysaa mobiilkaaga. Waxaad appkaas ka soo degsanaysaa App Store eller Google play. Raadi "hypernet direkt förälder".

Kadib waxaad waalid ahaan halkaas ku qoreysa jadwalka ilmahaagu ku joogayo dugsiga barbaarinta, laakiin waxaa taas laga samayn karaa oo qura barta internet ee lagama samayn karo appka mobiilka. Xasuuusnow in ay tahay in jadwal cusub lagu soo gudbinaayo maadaama wax ka beddelku uu dhaco afartii toddobaad iyo ka badanba mar. Waxaad kaloo halkaas ka diiwaangelin kartaa maqnaanshaha ilmahaaga ama wixii fasax ah oo aad u qorsheysey, oo labadaba laga diiwaangelin karo barta internet iyo appka mobiilka.